



Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad

Muqdisho, 10 Nofembar 1974

L. 1 R. 12

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOBNIIN

BOGGA KOWAAD

SHARCI

- SHARCI L. 48, Tr. 10 Nofembar 1974 — *U Shaqaynta Dawladda.* Bog. 568
- SHARCI L. 49, Tr. 10 Nofembar 1974 — *Meelmarin Heshiis.* » 572
- SHARCI L. 50, Tr. 10 Nofembar 1974 — *Wasaaradaha Ganacsiga Gudaha iyo Dibedda oo la mideeyey.* » 573
- SHARCI L. 51, Tr. 12 Nofembar 1974 — *Wasaaraddii Qorsheynta oo loo wareejiyey Agaasin Guud oo ka tirsan Madaxtooyada G.S.K.* » 574

BOGGA LABAAD

X E E R

- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
caabid Xoghayayaal Cusub. Bog. 576
- CAANKA, Tr. 12 Nofembar 1974, L. 132 — Maga-

- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 10 Nofembar 1974, L. 133 — *Maga-
caabid Guddoonshaha Baanka Qaranka.* Bog. 577
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 11 Nofembar 1974, L. 134 — *Deter-
mination of the quantities of a New Issue of Banknotes
in Somali Shillings.* » 578
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 11 Nofembar 1974, L. 134 — *Caddayn
tirada Lacagta ee Xaashida ah oo la soo saari doon* » 580
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 11 Nofembar 1974, L. 135 — *Distinc-
tive marks and the technical.* » 581
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 11 Nofembar 1974, L. 135 — *Caddayn
Summadaha iyo Farsamada Xaashiyaha Lacagta oo
Shilin Soomaalî ah.* » 584
- XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KA-
CAANKA, Tr. 10 Nofembar 1974, L. 136 — *G.le Dhexe
Maxamad Yuusuf Ciilmi (Bashîir).* » 586
- XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, Tr. 17
Nofembar 1974, L. 137 — *Magacaabid Xubno Gud-
diga.* » 587
- XEER WASARADDA HAYLAHA GUUD, Tr. 10 Nofem-
bar 1974, L. 138 — *Dhul Dawladdeed la siiyay Jaalle
Salaad Aadan Layan.* » 588
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Nofem-
bar 1974, L. 139 — *Dhul Dawladeed la siiyay Jaalla
Saulex Cumar Maxamad.* » 589
- XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 10 Nofem-
bar 1974, L. 140 — *Dhul Dawladeed la siiyay Jaalle
Saalax Cumar Maxamad Arman, Cabdow Cumar Ma-
mad.* » 590

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 8 Dishembar
1974 Beddelaad Naada Dhul — *Dahaaba Warsama.* (261) Bog. 592

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 8 Dishembar
1974, Beddelaad Naado Dhul — *Cabdigani Garaad.*
(262) Bog. 592
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 8 Dishembar
1974, Beddelaad Naado Dhul — *Shariifow Axmed Ma-*
xamud. (263) » 593
- MAXKAMADDA DEGMADA BERBEERA, Tr. 31 Oktoobar
1974, Dhumidda Jeegga L. 19433 Sh. So. 45.000 —
U Leyahay Cusman Xaaji Cali. (264) » 594
- BANKIGA QARANKA SOMALIYEED, Tr. 18 Nofembar
1974 — *Heerka Sarrifka Lacagaha Qlaad.* (265) » 594
- AGRICOLA INDUSTRIALE GEER, S.p.A., MARKA,
Tr. 9 Dishembar 1974 — *Isugu Yeerid Fadhi Caadi ha.*
(266) » 595
- AGRICOLA IINDUSTRIALE GEER, S.p.A., MARKA,
Tr. 9 Dishembar 1974 — *Avviso di Convocazione di*
Assemblea Ordinaria. (266) » 596
- SHIRKADDA FIYAAD SOOMAALIYA, S.p.A., Tr. 11
Dishembar 1974 — *Ogeysiis.* (267) » 596
- SHIRKADDA FIYAAD SOOMAALIYA, S.p.A., Tr. 15
Dishembar 1974 — *Ogeysiis Kordhinta maaliyadda*
Shirkadda min. 1.700.000,00 ilaa 1.960.000. (268). » 596

BOGGA KOOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 48, Tr. 10 Nofembar 1974..

U Shaqaynta Dawladda.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;
ISAGOO ARKAY Sharciga Lamb. yahay 66 ee soo baxay 29 Ok-
toobar 1972;

ISAGOO AQOONSAN Inay tahay lagama maarmaan in la soo
saaro sharci cusub oo daryeelaya danta guud ee Shaqaalaha Soomaali-
yeed si loo gaaro caddaalad ijtimaaci ah;

ISAGOO TIXGELINAAYA Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha
Dawladda ee Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka
iyo kan Xoghayayaasha Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

U shaqeynta Dawladda

U shaqeynta Dawladda (wixii aan ahayn Ciidamada Qalabka Sida)
waxaa lagu dhaqmayaa sida uu dhigaayo sharcigan, hase yeeshee Gud-
doomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka wuxuu awood u leeyahay marka:

- b) — baahi weyni jirto,
- t) — maslaxada qaranka ay ku jirto,
- j) — iyo marka ay jiraan waxyaalo kale oo gaar ah.

Inuu amro qorniin shaqaale iyadoo aan la marin habka uu dhigaayo
sharcigan.

Qodobka 2aad

Weydiinta qoridda shaqaalaha

1. Wasaaradda iyo Wakaaladaha madaxa banaan marka ay u baahdaan shaqale, waxay weydiisanayaan Xafiiska Agaasinka Guud ee Shaqaalaha Dawladda.

Xafiiskaasuna weydiintooda wuxuu ku faafinayaa wargeeysyada.

2. Sidaas oo kale wax allaale wixii ku saabsan qorniin shaqaale oo ay u baahdaan shirkadaha gaarka ah (Private Entities) waxaa maamulaya Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga oo loo dirayo weydiinta shaqaalaha.

Qodobka 3aad

Shaqaalaha aan aqoon gaar ah looga baahneyn

1. Wax allaale oo ku saabsan shaqaale aan aqoon gaar ah looga baahneyn (subordinate Staff), kuwaasoo ay ka mid yihiin: Adeegayaasha, Ilaaliyayaasha, loona qorayo Wasaaradaha, Xafiisyada Dawladda, Wakaaladaha, Shirkadaha gaarka ah, waxaa ku shaqo leh Guddiga Kacaanka Gobollada iyo Degmooyinka, kuwaasoo si caddaalad ah u soo maga-caabaya Shaqaalihii la weydiisto.

2. Qof walba oo shaqo raadinaaya waa inuu qori karaa akhriinna karaa Af Soomaaliga.

Qodobka 4aad

*Sitayaasha Shahaaddada Jaamacadda iyo wixii u dhigma
(University Degree holders or its equivalent)*

Qofkii aan horay Dawladda ugu shaqeyn jirin marka uu Shahaadda-daas qaato, waa inuu galaa dugsiga «Xalane» oo tababarka iyo Hanuuninta Siyaasadda iyo Aydiyooloojiyada.

Qodobka 5aad

*Sitaha shahaaddada Dugsiga Sare
(Secondary School Certificate holders)*

Sitayaasha shahaaddada Dugsiga Sare iyo wixii u dhigma oo kale:

- b) — Tababarka Dugsiga Hanuuninta ee Xalane Dhammeysta,
- t) — soo maray shaqada qaranka.

Waxaa la qori karaa shaqada Dawladda iyagoo aan soo marin im-tixaan tartan ah.

Qodobka 6aad

*Sitayaasha shahaddada dugsiga Dhexe
(Intermediate school certificate holders)*

1. Sitayaasha Shahaaddada Dugsiga Dhexe iyo wixii u dhigma,

waxay shaqada Dawladda gali karaan marka ay maraan Imtixaan tartan ah, Imtixaankaas oo ay maamulayaan Guddiyada shaqo siinta u gaarka ah oo lagu tilmaamay sharcigan.

2. Gudbayaasha Imtixaankaas waxaa la galin doonaa tababar shaqo iyo Hanuunin.

Qodobka 7aad

Shaqaalaha Farsamoyaqaannada ah

Qoridda Shaqaalaha Farsamoyaannada ah, aan sidan shahaadada Dugsiga Sare iyo kan dhexe, waxay ku xiran tahay Imtixaan tartan ah oo ay qaadi doonaan Guddiyada shaqo siinta u gaarka ah. Guddiyadaas waa inay ka mid noqdaan dad aqoon u leh farsamadaas Dadka loo qorayo.

Qodobka 8aad

Guddiyada maamulaya Imtixaannada Shaqaalaha

Imtixaan kasta oo ku saabsan qoridda shaqalaha waxaa maamulayo labada guddi oo hoos ku qoran:

1. — Haddii uu yahay Imtixaan ku saabsan Dawladda iyo Wakaa-ladahooda waxaa maamulaya guddiga hoos ku qoran:

- b) — Wakiil ka socoda Xafiiska Agaasinka Guud ee Shaqaalaha Dawladda — Guddoonshe
- t) — Wakiil ka socda Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga — Xubin
- j) — Wakiil ka socda Taliska Nabad Sugedda Soomaaliyed. — Xubin
- x) — Wakiil ka socda Xafiiska Siyaasadda Ma-daxtooyada GSK. — Xubin.

2. — Haddii uu yahay mid ku saabsan Shirkadaha Gaar ah, waxaa maamulaya Guddiga soo socda:

- b) — Qof ka wakiil ah Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga — Guddoonshe
- t) — Qof ka wakiil ah Taliska Nabad Sugidda Soomaaliyeed — Xubin
- j) — Qof ka wakiil ah Xafiiska Siyaasadda M. G. K. — Xubin
- x) — Qof ka wakiil ah Shirkadda dan ka leh qor-niinka — Xubin

Qodobka 9aad

Shaqooyinka looga baahdo Gobolada iyo Degmooyonka

Gobollada iyo Degmooyinka wixii shaqo ah oo looga baahdo waxaa qori doona wakiilada u jooga xubnaha lagu sheegay qodobka 8aad.

Gobollada iyo degmooyinka xubintii aan wakiil ku lahayn, waxaa jagadooda buuxinaaya Guddoomiyaha Degmada.

Qodobka 10aad

Ciqaabta

1. Qof kasta oo qorta ama qora shaqaale nooc kasta ha ahaadeene isagoo aan soo marin habka shaqo siinta oo uu dhigaayo sharcigan, haddii waxa uu sameeyey ayan aheyn dambi ka sii culus, waxaa lagu qaadaya a dambi ay ciqaabtiisu tahay xarig ilaa 6 bilood ama ganaax lacageed oo ah Sh. 1.000 ilaa 10.000 Sh. ama labadaba oo la isugu daro, hase yee eshee xarigga lacag waa lagu beddeli karaa.

2. Qof shaqaalaha ah oo la qoray isagoo aan la soo marin habka shaqo qoridda uu dhigaayo sharcigan, waa in shaqada laga saaro si deg deg ah isagoo wax xaq ah aan u dacwoon karin.

3. Dacwooyinka lagu qaadayo sharcigan waxaa ku shuqul leh Maxkamadda Badbaadada Dalka.

Qodobka 11aad

*Shaqaalaha ay u baahdaan hay'adaha Dawladaha ka dhexeeya
iyo Safaaradaha*

Hay'adaha Dawladaha ka dhexeeya iyo Safaaradaha Shisheeyaha oo Dalka Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya, shaqaalaha ay u baahdaan sharcigan baa lagu dhaqayaa.

Imtixaannada shaqaalaha ay u baahan yihiin waxaa maamulaya guddiga ku qoran qodobka 8aad qeybta (2) ee sharcigan.

Qodobka 12aad

«Sharcigani ma saameynayo dadka ka shaqeeya guryaha, makhaayadaha, dukaammada, baabuurta qof gaar u leeyahay iyo kuwa looga baahanyahay shaqooyinka aan joogtada ahayn ee dhismaha Guryaha».

Qodobka 13aad

Tirtir

Waxaa la tirtiray sharciyada hoos ku qoran:

2. — Qodobbada Sharciga Shaqaalaha (Labour Code) ee Lamb. 65, oo soo baxay 18-10-1972 ee ka soo horjeeda sharcigan.
3. — Qodobbada sharciga shaqaalaha Dawladda (Civile Service Law) ee Lamb. yahay 29 soona baxay 1-4-1970 ee ka soo horjeeda sharcigan.
4. — Qodobbada sharciga ku saabsan qoridda shaqaalaha Dawladda Hoose ee Lamb. yahay 4 soona baxay 15-7-1973 ee ka soo horjeeda sharcigan.
5. — Sharci kasta oo kasoo horjeeda ama aan la soconiin sharcigan.

Qodobka 14aad

Dhaqan galid

Sharciganj wuxuu dhaqan galyaa si deg deg ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Dishembar 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 49, Tr. 10 Notembar 1974.

Meelmarin Heshiis.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaankii Oktoober 1969;

ISAGOO ARKAY Go'aankii ka soo baxay labada Gole fadhigoodii 30kii Noofeber 1974;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Meelmarin Heshiis

Heshiiska deynta Horumarinta (mashruuca Tacliinta ee Labaad) ee dhexmaray Hay'ada Horumarinta Adduunka (IDA) iyo Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ee la kala saxeeaday 19-9-1974; waa la oggolaaday. waxaanu ka mid noqon doonaa sharciyada u yaalla dalka.

Qodobka 2aad

Dhaqan Gal

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba, waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Nofember 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 50, Tr. 10 Nofembar 1974.

Wasaaradaha Ganacsiga Gudaha iyo Dibeedda oo la mideyey.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xashidii 1aad iyo tii 2aad ee kacaanka iyo Sharcigii 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in la mideeyo xubnaha dawladda ee qaabilsan Ganacsiga Gudaha iyo Ganacsiga Dibedda;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii ka soo baxay fadhigii Golaha Sare ee kacaanka ee 5-12-1974:

WUXUU GUDDOOMIYEEY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Labadii Wasaaradood ee Ganacsiga Gudaha iyo Dibedda waa la mideeyay.

2. Labada Wasaaradood xilkoodii iyo shaqadoodii waxa loo wareejinaya Wasarad cusub ee loo aqoonsan doono Wasaaradda Ganacsiga.

Qodobka 2aad

Wax allale wixii shaqaale qalab ama hanti ay lahaan jireen labada Wasaaradood ee kor ku xusan waxa la wareegaysa Wasaaradda cusub ee Ganacsiga.

Qodobka 3aad

Xeerar u gaar ah Wasaaradda Ganacsiga ayaa la sameya doona oo saameynaya maamulka gudaha.

Qodobka 4aad

1. Wasaaradda Ganacsiga cusub ee ku xusan qodobka 1aad waxa kale oo ay la wareegi doontaa wixii xuquuq iyo waajibaad ah oo ay lahaayeen Wasaaradihii Ganacsiga ee hore.

2. Isla markaana Wasaaradda Ganacsiga waxay fulin doontaa, xilkoodiina qaadi doonta wixii heshiisyo ahaa ee ay hore u galeen labada Wasaaradood.

Qodobka 5aad

Waxa allale wixii Sharci ama xeer ah ee ka soo horjeeda ama aan la soconin Sharcigan waa la baaba'shay.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqan geliya isla maaliintan waxaana lagu soo saari doona Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Disember 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

SHARCI L. 51, Tr. 10 Nofembar 1974.

Wasaaraddii Qorsheynta oo loo wareejiyey Agaasin Guud oo ka tirsan Madaxtooyada G.S.K.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad ta 2aad ee Kacaanka iyo sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga L. 10 ee 1dii August 1966 iyo kuwa kale ee khuseeya Wasaaradda Qorsheynta iyo Iskuduwidda;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka ka soo baxay Golaha Sare ee Kacaanka 5-12-1974;

WUXUU GUDDOOMIYEEY

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Wasaaraddii loo yiqiin Wasaaradda Qorshaynta iyo Isku-duwidda waa la baabi'yey.

Qodobka 2aad

Waxa laga dhisayaa Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka agaa-
sin Guud oo la wareegi doona hawlihii iyo xilkii ay qaban jirtay Wasaa-
radda Qorsheynta iyo Isku-duwiddu.

Qodobka 3aad

Miisaaniyaddii Wasaaradda Qorsheynta, shaqaaleheeda iyo wixii ay
hanti iyo qalab lahayd waxa lagu wareejiyey Madaxtooyada Golaha Sare
ee Kacaanka. Isla markaa wixii ay Wasaaraddu heshiisyo hore gashayna
waxa xilkoodii la wareegi doona Madaxtooyada G.S.K.

Qodobka 4aad

Xeerka ku saabsan maamulka gudaha ee Agaasinka cusub ee Qor-
sheynta dhakhso ayaa loo soo saari doonaa.

Qodobka 5aad

Sharciga L. 10 ee 1dii August 1966 iyo wixii kale ee sharci ah ee ka
soo horjeeda ama khilaafsan sharcigan, waa la buriyey.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba waxaana lagu soo
saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 10 Disember 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

BOGGA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 10 Disember 1974, L. 132.

Magacaabid Xoghayayaal Cusub.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad ee Kacaanka, iyo sharcigii 1aad ee soo baxay 21 Oktoobaar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga dhismaha Dawladda (Law on the Organisation of Government L. 14 ee 3dii Juun 1962);

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in la magacaabo Xoghayayaal cusub;

ISAGOO TIXGELIYEY Go'aankii ka soo baxay fadhigii G.S.K. 5-12-1974;

WUXUU GUDDOOMIYEY

Xeerka soo socda:

Qodobka Qudha

In marka laga bilaabo bisha Disember 6deedii 1974 Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo magacaabo xoghayayaal.

1. — S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib — Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
2. — Dr. Cabiraxmaan Nuur Xirsi — Wasaaradda Maaliyadda.
3. — Dr. Axmed Maxamed Maxamuud — Wasaaradda Ganacsiga.
4. — Dr. Maxamed Xasan Aadan — Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarint.
5. — Dr. Shariff Saalax Maxamed — Wasaaradda Tacliinta Sare.

6. — Dr. Maxamed Xawaale — Wasaaradda Hawlaha Guud.
7. — Maxamed Buraale — Wasaaradda Gaadiidka.
8. — Dr. Xuseen Cabdulqaadir Qaasim — Wasaaradda Macdanta.
9. — Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad — Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Boosaha.
10. — Dr. Yuusuf Cali Cusmaan — Wasaaradda Xoolaha Dhirta iyo Daaqa.
11. — S. Guuto Maxamed Ibraahim — Wasaaradda Beeraha.
12. — Cabdullahi Maxamed Xasan (Faash) — Wasaaradda Warfaafinta iyo H. Ummadda.
13. — Aadan Maxamed Cali — Wasaaradda Shaqada iyo Isboorta.
14. — Dr. Jaamac Rabiile Good — Wasaaradda Dalxiiska.

Muqdisho, 10 Disember 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 10 Disember 1974, L. 133.

Magacaabid Guddoonshaha Baanka Qaranka.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo ta 2aad ee Kacaanka iyo sharciga 1aad ee 21kii Oktoober 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga dhismaha Baanka Qaranka Soomaaliyeed (No. 6, 19-8-1968);

ISAGOO ARKAY Baahida loo qabo in Baanka kor ku qoran loo magacaabo Guddoonshe cusub;

ISAGOO TIXGELIYEEY Go'aankii ka soo baxay G.S.K. 5-12-1974;

WUXUU GUDDOONIYEEY

Xeerka soo socda:

Qodobka Qudha

In marka laga bilaabo Bisha Disember 6da 1974, loo magacaabo Jaalle Cumar Axmed Cumar Guddoonshaha Baanka Soomaaliyeed.

Muqdisho, 10 Disember 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

DECREE OF THE PRESIDENT OF THE SUPREME REVOLUTIONARY

COUNCIL No. 134 of 11 December 1974.

Determination of the quantities of a new issue of Banknotes in Somali Shillings.

THE PRESIDENT
OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First Charter of the 21st October, 1969 Revolution and the Law No. 1 of 21st October 1969;

HAVING SEEN Art. 5 of Decree-Law No. 2 of 26th March 1961 converted into Law No. 13 of 23rd May 1961, on the Monetary Ordinance of Somalia;

CONSIDERING the necessity of determining the quantities in Somali Shilling of a further issue of banknotes;

HAVING HEARD the Council of the State Secretaries, on the proposal of the Governor of the Somali National Bank.

DECREES:

Art. 1

It is authorized to issue:

- a) Number 2,100,000 (Two millions hundred thousand) of So. Sh. 100 (one hundred) notes for a total of So. Sh. 210,000,000 (Two hundred ten millions) of the series numbered progressively from 000001 to 1,000,000 marked by the letter « J » followed by 002 and from 000001 to 100,000 marked by the letter « J » by 003.
- b) Number 10,000,000 (Ten millions) of So. Sh. 20 (twenty) notes for a total of So. Sh. 200,000,000 (Two hundred millions) divided into ten series of 1,000,000 notes each and progressively numbered from 000001 to 1,000,000 marked by letter « J » followed by 001 up to 010.
- c) Number 6,000,000 (Six millions) of So. Sh. 10 (ten) notes for a total of So. Sh. 60,000,000 (Sixty millions) divided into six series of 1,000,000 notes each progressively numbered from 000001 to 1,000,000, marked by the letter « J » followed by 001 up to 006.
- d) Number 6,000,000 (Six millions) of So. Sh. 5 (five) notes for a total of So. Sh. 30,000,000 (Thirty millions) divided into six series of 1,000,000 notes each progressively numbered from 000001 to 1,000,000 and marked by the letter « J » followed by 001 up to 006.

Art. 2

The 5, 10, 20, and 100 Somali Shilling notes referred to in the previous article will have the technical and artistic features established by a separate Decree under today's date.

Art. 3

This Decree will come into force on the date of its publication on the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadiscio, 11th December, 1974.

The Secretary of State for Finance

Abdurahman N. Herzi

THE PRESIDENT
of Supreme Revolutionary Council
Major General Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 11 Disember 1974, L. 34.

Caddayn tirada Lacagta cusub ee Xaashida ah oo la soo saari doono.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida kowaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969, iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar, 1969;

MARKUU ARKAY Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 26kii Maarso, 1961 loona beddelay Sharciga Lr. 13 oo soo baxay 23kii Maajo, 1961, kuna saabsan Nidaamka Lacagta Soomaaliya;

ASAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in la caddeeyo tirada lacagta xaashida cusub oo Shilin Soomaaliga ah ee la doonayo in la soo saaro;

ASAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Xoghayayaasha iyo talad uu soo jeediyey Taliyaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolyaha in la soo saaro:

- b) 2,100,000 xabbo (labamalyaniyoboqolkun) oo ah xaashida 100 (boqolka) Shilin, qiimahooduna yahay Sh. So. 210,000,000 (lababoqoliyotobanlyan) oo Shilin oo ah horin «series» kana bilowda lambar is-dabajoog ah 000001 ilaa iyo 1,000,000 oo sita xarafka « J » oo uu ka dambeeyo Lr. 001 iyo lambar is-dabajoog ah oo ka bilowda 000001 ilaa iyo 1,000,000 oo sita xarafka « J » oo uu ka dambeeyo Lr. 002 iyo lambar is-dabajoog ah oo ka bilowda 000001 ilaa iyo 1,000,000 oo sita xarafka « J » oo uu ka dambeeyo Lr. 003.
- t) 10,000,000 oo xabbo (tobanmalyan) oo ah xaashida 20 (labaa-tanka) Shilin qiimahooduna yahay Sh. So. 200,000,000 (lababoqol oo mayan oo Shilin) una qaybsan toban horimood «series» oo midkiiba yahay 1,000,000 oo xaashiyood oo iskugu xiriira lambar is-dabajoog ah oo ka bilowda 000001 ilaa iyo 1,000,000 oo sita xarafka « J » oo uu ka dambeeyo Lr. 001 ilaa iyo 010.
- j) 6,000,000 oo xabbo (lixmalyan) oo ah xaashida 10 (tobanka) Shilin, qiimahooduna yahay Sh. So. 60,000,000 (lixdanmalyan oo Shilin) una qaybsan lix horimood «series» oo midkiiba

yahay 1,000,000 oo xaashiyood oo iskugu xiriira lambar is-dabajooga oo ka bilowda 000001 ilaa iyo 1,000,000 oo sita xarafka « J » oooo uu ka dambeeyo lambar 001 ilaa iyo 006.

- x) 6,000,000 oo xabbo (lixmalyan) oo ah xaashida 5 (shanta) Shilin, qiimahooduna yahay 30,000,000 (soddonmalyan oo Shilin) una qaybsan lix horimood « series » oo midkiiba yahay 1,000,000 oo xashiyood oo iskugu xiriira lambar is-dabajoog ah oo ka bilowda 000001 ilaa iyo 1,000,000 oo sita xarafka « J » oo uu ka dambeeyo lambar 001 ilaa 006.

Qodobka 2aad

Xaashiyaha lacagta ee ah 5, 10, 20 iyo 100 oo Shilin Soomaaliga ah oo qodobka hore lagu tilmaamay, waxaa si tifaftiran loogu caddeeyey summadda iyo farsamadaba xeer kale oo taariikhda maanta ah soo baxay.

Qodobka 3aad

Xeerkanii wuxuu dhaqangelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 11 Disember 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda

Cabdiraxman N. Xirsi

DECREE OF THE PRESIDENT OF THE SUPREME REVOLUTIONARY

COUNCIL No. 135 of 11 December 1974.

Determination of the distinctive marks and the technical and artistic feature of the banknotes in Somali Shillings.

THE PRESIDENT

OF THE SUPREME REVOLUTIONARY COUNCIL

HAVING SEEN The First Charter of the October 21st, 1969 Revolution and the Law No. 1 of 21st October 1969;

HAVING SEEN Art. 5 of the Decree-Law No. 2 of March 6th, 1961 converted into Law No. 13 of May 23rd, 1961 on the Monetary Ordinance of Somalia;

lutionary Council on the determination of the quantities of the new banknotes to be issued in Somali Shillings;

CONSIDERING The necessity to establish the distinctive marks as well as the technical and artistical features of the 5, 10, 20 and 100 Somali Shilling new notes;

HAVING HEADD The Council of the State Secretaries on the proposal of the Governor of the Somali National Bank.

DECREES:

Art. 1

The new 5, 10, 20 and 100 Somali Shilling notes that the Somali National Bank is authorized to issue according to Decree No. 134 of 11-12-1974 of the President of Supreme Revolutionary Council will have the following distinctive marks and technical and artistical features:

Denom.	DESCRIPTION	Size
--------	-------------	------

Printing

The printing on all the banknotes are as follows:

Front: 1 direct plate steel engraved printing,
2 security lithographic printing in multicolours, and
1 letterpress printing.

Back: 2 security lithographic printings.

Paper

Mould made panel watermarked paper with melamine. There is a flourescent plastic thread incorporated in each note.

On the front of the banknotes there are printed from top to bottom, the following caption: «BANKIGA QARANKA SOOMAALIEYEED», the figure representing the value, the word «SHILIN», on the left the word «TALIAHA» and under it the signature of the Governor of the Somali National Bank, Omar Ahmed Omar, on the right, the word «LACAGHAYAHA» and under it the signature of the Cashier of the Somali National Bank, Mohamed Dalmar Abdurahman.

Serial numeber is printed on the upper left-hand side and the lower right-hand side, whereas the banknote distinctive number is printed on the upper right-hand side and on the lower left-hand side.

In the corners, alternatively in English and Somali, there is the caption: «5, 10, 20, 100 SHILIN and SHILLINGS» according to the value.

On the back of the banknotes there is a light-coloured circular area on the left-hand side containing the watermark, which is an inside turned portrait of the Somali freedom-fighter, Sayed Mohamed Abdulle Hassan, 4 white corner prints 2 in Arabic and one each in Somali and English reading «5, 10,20, 100 SOMALI SHILLINGS and SHILIN SOOMAALI».

Denom.	DESCRIPTION	Size
	In the upper part of the note there is a caption in Arabic and English reading «SOMALI NATIONAL BANK».	
100	Dominant Colours Blue.	
	On the Front a Vignette showing Symbol of independence. Monument of Dagahtur, Mogadishu National Coat of arms.	165x80
	On the Back Vignette showing Industrial plant.	
20	Dominant Colours Brown.	
	On the Front Vignette showing Somali National Bank building and National Coat of arms.	165x80
	On the Back Vignette showing Somali Cattle.	
10	Dominant Colours Green.	
	On the Front Vignette showing Sheikh Abdulaziz mosque and National Coat of arms.	152x72
	On the Back Vignette showing boat building.	
5	Dominant Colours Purple.	
	On the Front Vignette showing Somali scene with wildebeest and zebra. National Coat of arms.	152x72
	On the Back Vignette showing banana harvesting	

Art. 2

This Decree will come into force on the date of its publication on the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 11th December 1974.

THE PRESIDENT

of Supreme Revolutionary Council
Major General Mohamed Siad Barre

The Secretary of State for Finance
Abdurahman N. Hersi

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 11 Dishembre 1974, L. 135.

Caddayn Summadaha iyo Farsamada Xaashiyaha Lacagta oo Shilin Soomaali Ah.

**GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

MARKU ARKAY Xaashida kowaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar, 1969;

MARKU ARKAY Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 26kii Maarso, 1961 loona beddeley Sharciga Lr. 13 oo soo baxay 23kii Maajo, 1961, kuna saabsan Nidaamka Lacagta Soomaaliya;

MARKU ARKAY Xeer Lr. 134 ee Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka oo lagu caddeeyey tirada lacagta cusub ee xaashida shilin soomaaliga ah oo la soo saari doono;

ASAGOO TIXGELINAYA baahida loo qabo in la tilmaamo summadaha iyo farsamada lagu samaynayo xaashiyaha lacagta cusub oo ah 5, 10, 10 iyo 100 Shilin Soomaali;

ASAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Golaha Xoghayayaasha iyo talada uu soo jeediyey Taliyaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

Lacagta xaashida cusub oo ah 100, 20, 10 iyo 5 Shilin Soomaali ee Bankiga Qaranka Soomaaliyeed loo oggolaaday inuu soo saaro asagoo tixraacaya Xeerka Lambarkiisu yahay 134, taariikhdiisuna tahay 11 Dishembre 1974, waxay leedahay summadahaan u gaarka ah iyo tilmaahaan ku saabsan xagga farsamada iyo farshaxanka, sida hoos ku qoran:

Tiro

TILMAAN

Cabbir

Daabac

Daabaca warqadaha laacagta oo dhani waa sidaan:

Waji: Daabac ah «1 direct plate steel engraved»,
2 «security lithographic» oo midabya badan iyo
1 «letterpress».

Dhabar: Daabac ah 2 «security lithographic».

Warqad

Warqadda waxaa laga sameeyey «mould panel watermarked» ay weheliso «melamine».

Warqad kasta waxaa ku dhafan dun balaastik ah oo bir-birgaysa.

Warqadaha wajigooda, kor laga soo bilaabo ilaa hoos, waxaa ku qoran hadalladaan soo socda: BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED», tirada tilmaamaysa qii maha lacagta, ereyga «SHIILIN» dhanka bidixdana ereyga «TALIYAHA» hoostiisana saxiixa Taliyaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Cumar Axmed Cumar, waxaa ku xiga ereyga «LACAGHAYAHA» hoostiisana saxiixa lacaghayaha Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Maxamed Dalmar Cabdurahmaan.

Seeriyaha lacagtu wuxuu ku yaal, kor dhanka bidixda iyo hoos dhanka midigta lambarkuna wuxuu ku yaal kor dhanka midigta iyo hoos dhanka bidixda.

Geesaha isdhaaf waxaa ugu yaal, ayadoo af Soomaali iyo af Ingriisba ah, hadalladaan «5, 10, 20, 100 - SHILIN - SHILLINGS» hadba qiimaha lacagtu siduu yahay.

Dhabarka warqadaha, dhanka bidixda, waxaa ku yaal goobaabin midab khafiifa leh uu ku jir «watermark». Kaasoo ah masawirka madaxii geesigii Soomaaliyeed, Sayid Maxamed Cabdulle Xasan, 4 naqshadood: 2 af Carabi ah 1 af Soomaali ah iyo 1 af Ingriis ah oo muujinaya hadalkaan «5, 10, 20, 100 - SOMALI SHILLINGS - SHILIN SOOMAALI».

Warqadaha dhanka hore waxaa ku yaal hadalkaan oo af Carabi iyo af Ingriis ah «SOMALI NATIONL BANK».

Tiro		TILMAAN	Cabbir
100	Midabka ugu badan	Bulug.	
	Wajiga	Masawir tilmaamaya madaxbannaanida Soomaalida. Taallada Dhagaxtuur, Muqdisho. Summadda Dowladda.	165x80
	Dhabarka	Masawir muujinaya Warshad.	
20	Midabka ugu badan	Maariin.	
	Wajiga	Masawir muujinaya Dhiska Bankiga Qaranka Soomaaliyeed. Summadda Dawladda.	165x80
	Dhabarka	Masawir muujinaya Lo'da Soomaaliya.	
10	Midabka ugu badan	Cagaar.	
	Wajiga	Masawir muujinaya Masaajidka	

	Shiikh Cabdulcasiis. Summadda Dawladda.	152x72
Dhabarka	Masawir muujinaya doonni la dhisayo.	
5	Midabka ugu badan Casuur (purple).	
Wajiga	Masawir muujinaya miyiga Soo- maaliya oo leh lo' gisi iyo dameer farow. Summadda Dawladda.	152x72
Dhabarka	Masawir muujinaya moos la jarayo.	

Qodobka 2aad

Xcerkani wuxuu dhaqangelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta
Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 11 Dishembre 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre
Guddoonshaha Golaha Sare ee Kacaanka

Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda
Cabdiraxmaan N. Xirsi

XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 10 Dishembre 1974, L. 136.

G.le Dhexe Maxamad Yuusuf Ciilmi (Bashir).

GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xashida 1aa iyo tii 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO OGAADAY In G.le Dhexe Maxamed Yuusuf Ciilmi (Ba-
shiiir) uu ka soo bixi waayey xilkii uu uga abbaarnaa Golaha Sare ee
Kacaanka;

ISAGOO TIXGELINAYA Go' aankii Golaha Sare ee Kacaanka ee
soo. baxay 6-12-1974.

WUXUU GUDDOOMIYAHA

Qodobka Qura

In G.le Dhexe Maxamed Yuusuf Ciilmi (Bashiiir) marka laga bilaabo

6da Dishembar 1974 laga fadhiisiiyey xilkii Golaha Sare ee Kacaanka, caafumaad daro awgeed.

Muqdisho, 10 Dishembar 1974.

Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay - Diiwaanka Bogga lamb. 62.

Muqdisho, 16 Dishembar 1974..

Hantidhawraha Guud:

G. Dhexe. CABDILAAHI WARSAME NUUR

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

Tr. 17 Nofembre 1974, L. 137.

Magacaabid Xubno Guddiga.

XOGAYAHA HAWLAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida Kowad iyo tan Labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969kii;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 52, Taariikh 8 Juun 1972;

ISAGOO ARKAY Xeer Madaxweynaha GSK Lamb. 66, Taariikh 23-1-1973, lagu naadiyay Faafinta Rasmiga ah ee 15-7-1973, Lam. 13 Bis;

ISAGOO ARKAY Xerka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Lambar. 11765, Taariikh. 29-11-1972;

MARKUU ARKAY Inaay tahay lagama maarmaan in la badiyo tirada Xubnaha Guddiga Kacaanka Degmada Dhuusamreeb lana waafajiyo Idaaradda Degmooyinka Derejada « A »;

ISAGOO TIXGELINAYAHA Taladii uu soo jeediyay Guddiga Kacaanka Gobolka Galguduud;

WUXUU XEER KA DHIGAY

Qodobka 1da

Jaalleyaalka magacdoodu halka hoose ku taxan yahiin waxa loo magacaabay Xubno Guddiga Kacaanka Degmada Dhuusamareeb: (1) Nuur «Calas» Faarax Shuuriye, (2) Xaliima Warsame Cukeyr, (3) Macaallim Maxamud Cali Gaban, (4) Macaallim Maxamuud Cumar.

Qodobka 2ad

Xeerkani isla maanta ayuu dhaqan felayaa waana in lagu nadiyaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, li 17 Nofembre 1974.

XOGHAYAHA DOWLADDA
ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
S. G. Xuseen Kulmiye Afrax

XEER WASAARADDA HAWALA GUUD

Tr. 11 Nofembre 1974, L. 138.

Dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Safaad Aadan Loyan.

XOGAYAHA HAWLAHA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23kii Maajio 1961;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Salaad Aaden Loyan taarikhdu markay ahayd 23-10-1963 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho — Xafadda Valle Nord, kuna dhacaaya qaybta VII Esterna;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. sonna baxday iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 12899, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose, ee Muqdisho — fadhigoodii 338aad taarikhduna ahayd 31 Agosto 1964, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 26901 ee 26 Sett. 1964 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Salaad Aaden Loyan uu bixiyay lacag dhan Sh, So. 480, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 960, loona tiriyay Salaad Aaden Loiyaan sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 31 Oktoobar 1964;

ISAGA OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Salaad Aaden Loiyan oo ku yaal Muqdisho, Xafadda Valle Nord kuna fadhila mq. 960.

Muqdisho, 10 Nofembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan

VISTO e Registrato - Reg. n. 1, foglio n. 43.

Mogadiscio, li 18 Novembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUUR

XEER WASAARADDA HAWALA GUUD

Tr. 11 Nofembre 1974, L. 139.

Dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Saalax Cumar Maxamad.

XOGAYAHA HAWLAHA

ISAGA OO ARKAY Warqadii Koowaad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo xeerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 6 soona baxay 9 Jennayo 1967;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Saalax Cumar Maxamed Armaan taarikhdu markay ahayd 21 Maajio 1966 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho, Xafadda Hodan;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Wowladda, lamb. 1 R. L. 2 soona baxday 21-2-1974, iyadoo aan cidna horstaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 1323, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dismaha oo Dowladda Hoose, ee Muqdisho, fadhigoodii 11aa taarikhduna ahayd 6 Sett. 1973, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 107366 ee 16-9-1973 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Saalax Cumar Maxamed Armaan uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 1.350, kuna saabsan qii maha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 900, loona tiriyay Saalax Cumar Maxamed Armaan sida ku cad xaashida ay qortay Waaxda Farsamada Dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 18-2-1974;

ISAGO OO ARKAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameysa dhulka isaga ah;

X E E R

Waxaa cad dhul Dowladeed ah la siiyay Saalax Cumar Maxamed Armaan oo ku yaal Muqdisho — Xafadda Hodan kuna fadhila mq. 900.

Muqdisho, 10 Nofembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan

VISTO e registrato - Diwaanka lamb. 1, bogga lamb. 46.

Muqdisho, 21 Nofembre 1974.

Hantidhawrka Guud

G. Dhexe CABDULLAHI WARSAME NUUR

KEER WASAARADDA HAWALA GUUD

Tr. 11 Nofembre 1974, L. 140.

Dhul Dawladeed la siiyay Jaalle Saalax Cumar Maxamad Arman, Cabdow Cumar Maxamed, Arman iyo Cali Cumar Maxamed Arman.

XOGAYAHA HAWLAHA

ISAGA OO ARKAY Warqaddii koowaad iyo tii labaad ee Kaacaanka iyo Xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ISAGA OO ARKAY Xeer lamb. 144 soona baxay 23kii maajio 1961kii;

ISAGA OO ARKAY Arjigii uu keensaday Faarax Sugulle Samantar taariikhdu markay ahayd 11-6-1961 kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dowladeed, ku yaal Muqdisho Xafadda Hodan kuna dhacaaya qaybta VI;

ISAGA OO AQOONSAN Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyay looxa Dowladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, lamb. 1-5 soona baxday 10ka Maajio 1962, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGA OO ARKAY Naqshadda lamb. 9644, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 296aad taariikhduna ahayd 1-10-1962, kuna saabsaneed dhismo guri;

ISAGA OO ARKAY Bolleetada lamb. 9857 ee 3-12-1962, kuna soo baxday xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeyneysa in Faarax Sugulle Samantar uu bixiyay lacag dhan Sh. So. 729, kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyay;

ISAGA OO AQOONSAN dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 729, loona tiriyay Faarax Sugulle Samantar sida ku cad Xaashida ay qortay Waaxda Farsamada dhulka (verbale di consegna) taarikhdeeduna ahayd 14 Settembre 1963;

ISAGA OO ARKAY Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda Dhismaha Dhulka, taarikhdeeduna ahayd 15-9-1974 taasoo caddeyneysa in naqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen guddiga dhismaha oo Dowladda Hoose ee Xamar L. 9644 ee 1-10-1962 laguna haqiijiyay sida ay naqshaddu guriga waafaqsan;

ISAGA OO ARKAY Oggolaanta (N.O.) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xafadda Hodan laguna siiyay xaashida L. 9915 ee 9 Nofembre 1971 oo Dowladda Hoose ee Xamar;
o.ellod00

ISAGA OO ARKAY Qoraal (atto) lamb. 1767 Reb. taarikh. 18 Oktoobar 1971 lagu diiwaan geliyay Xamar 9-11-1971 L. 961, qoraal Dowladeed, Buuga 20 oo ah caddeynta Notaayada Dotoor Benvenuto Francesco Issak, taas oo Sheekh Nuur Cali Sugulle, oo ah wakiil dhaxaltooyodii Faarax Cumar Maxamed Arman, Cabdow Cumar Maxamed Arman iyo Cali Cumar Maxamed Arman, wax allaleh wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhulka ku fadhila mq. 729, kuna yaal Xamar Xaafadda Hodan;

ISAGA OO AQOONSAN in la tixgeliyay wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u kelinta dhulka Dowladeed (concessione e conseguente libera disponibilita) oo ay ujeeddadiisu ahayd dhis. Wuxuu soo saaraya;

X E E R

Waxaa dhul Dowladeed la siiyay, gacantana loo geliyay, (Concessione e conseguente libera disponibilita) loona aqoonsaday Saalax Cumar Maxamed Arman, Cabdow Cumar Maxamed Arman iyo Cali Cumar Maxamed Arman, dhul ku fadhiya mq. 729, kuna yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan.

Muqdisho, 10 Nofembre 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud

G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 41.

Mogadiscio, 18 Novembre 1974.

Il Magistrato ai Conti:

Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUUR

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay jaalle Dahaba Uarsama Ciilmi, maalintii 16-2-66, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Valle Nord, Jidka Sh. Calawi, uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolar, addimihiisuna ahaayeen 15x13,50, kuna fadhile 202,50 mdh., sababtoo ah jid maray dhulka qaar ka mid ah.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diraay warqadda lambarkeedu ahaa 931382 ee 5-4-66, kana baxday xafiisnaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar, addimihiisu yihiin 20x12, kuna fadhiya 240 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jidka 30ka maytar ah.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul dawladeed.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 34.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Muqdisho, 8 Dishembre 1974.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

(261)

Maxamed Cabdi Saciid

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdiqani Garaad Jaamac iyoljaabo Muuse Matan, maalintii 10-6-73 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, Jidka 26 Jun uu iska bed-

delay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolaar, addimihiisuna ahaayeen 40ee20, kuna madhiye 800 mdh., sababtoo ah in uu is beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lamborkeedu ahaa WHG-3-23-1162 ee 18-12-74, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektaangolaar, addimihiisu yihiin 20x60, kuna fadhiya 1200 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 13 iyo 19.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 15 iyo 48.
Muqdisho, 8 Dishembre 1974.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
(262) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWALAH GUUD

BEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Shariifow Axmed Maxamuud, maalintii 10-7-1959, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Kaaraan, Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa Elle L., addimihiisuna ahaayeen 50; 52; 32, kuna fadhiye 2.384 mdh., sababtoo ah in la beddelay qorshihii degmadaas.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 931464 ee 10-4-66, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa L., addimihiisu yihiin 48,40; 48; 30 kuna fadhiya 1977 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaa ka xiga: Markalyooni Marko.
Koofur waxaa ka xiga: Xuseen Maxamed iyo Maka Xasan.
Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Maeew Xuseen.
Bari waxaa ka xiga: Jid.

Muqdisho, 8 Dishembre 1974.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
(263) *Maxamed Cabdi Saciid*

MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA

Haddaan arkay weydiinta Gusmaan Xaaji Cali iyo warqada Bankiga Kaydka iyo Amaahda Laanta Berbera iyo qodobka 69 D. L. 1956 No. 2.

Waxaa cad dhumidda jeeqga L. 19433 Sos. 45,000, markaa waxaa la amarayaa in loo cubooneysiyo mar labaad buuggaas laguna dhigo Faafinta Rasmiga ah.

Waxaa kaloo la smarayaa in gacanta laga saaro Cusman Xaaji Cali marka lagu F:finta, waana in la sugo muddo 30 (soddon) maalmood ah oo ka bilaabanta marka Faafinta Rasmiga ah lagu qoro.

Waana in la siiyo Cusmaan Xaaji Cali Buuggaas ama qofka sita wakaalad sharci ah haddii aan la helin wax kale oo sheegan:ya.

Berbera, 31 Oktoobar 1974.

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmada Berbera
(264) *Ahmed Macalin Xasan*

BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

XEER LAMBAR 65 EE 18-11-74

Heerka Sarrifka Lacagaha Qalaad.

TALIYAHA BANKIGA QARANKA SOOMAALIYEED

MARKU ARKAY Qodobka 10aad Xeerka Lr. 12 ee 26kii Seteembar, 1964, laguna beddelay Sharciga Lr. 8 ee 29kii Oktoobar, 1974, kuna saabsan Xeerka u degsan Daadihintu Ganacsiga Dibedda, ee awood siinaya Bankiga Qaranka Soomaaliyeed, inuu caddeeyo marwalba qiimaha lagu iibsado lacagaha qalaad ee loogu beddelan karo lacagteenna.

ASAGOO TIXGELINAYA Dhawaan ciirciirsigii ka taagnaa lacagaha addunka, isbeddelaaddii qiimihii lacagaha qaad ka mid ah waddamada ku jira Hayadda Lacagaha Adduunka ee si rasmi ah u soo ogeysiisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

MARKII LA GARTAY In la dhawro dhaqaalaha waddankeenna.

ASAGOO OGSOON In horay loo qaatay go,aan deg deg ah Lr. 169 ee 1811-74, sida Sharciga Bankiga Qaranka Soomaaliyeed Lr. 27 ee 26-11-68 uu dhigayo.

WUXUU GUDDONOSHAY

In heerka sarrifka lacagaha qalaad ee hoos ku qoran, horeyna loogu caddeeyey Faafinta Rasmiga Ah, uu ahaan doono sida hoos ka muuqata,

laga bilaabo 20-11-74, waxaan go'aankaan lagu soo caddayn doonaa Faa-
finta Rasmiga Ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

LLacagta Qalaad	Heerka iisbsashada		Heerka Gadidda	
	oo ah	Sh. So.	oo ah	Sh. So.
US \$	1.00	6.2327		6.3573
UK £	1.00	14.4062		14.6943
D. M.	1.00	2.4347		2.4834
Lit.	107.33	1.0000		— — —
Lit.	105.18	— — —		1.0000
F. Fr.	1.00	1.3079		1.3341
S. Fr.	1.00	2.1897		2.2335
D. Fr.	1.00	0.03525		0.03596

Muqdisho, 18-11-1974.

(265)

TALIYAHA

Cabdiraxmaan N. Xirsi

AGRICOLA INDUSTRIALE GEER S.p.A. — MERCA

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

L'Amministratore Unico della Agricola Industriale GEER S.p.A. con Sede legale n Merca invita tutti i Soci e i Sindaci a partecipare alla Assemblea Ordinaria che si terrà il giorno 30 Gennaio 1975 in prima convocazione nell'Ufficio dell'Avv. Omar Hagi Mohamed «Bot» per trattare il seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1. — Provvedimenti ai sensi dell'art. 2364 c. c.
2. — Varie ed eventuali.

Nel caso in prima convocazione non venisse raggiunto il numero legale l'Assemblea verrà rinviata al 15-2-1975.

Il presente avviso annulla e sostituisce il precedente.
Merca, 9 Dicembre 1974.

Agr. Ind. GEER S.p.A.
L'Amministratore Unico

(266)

Maamulaha Kaliba

AGRICOLA INDUSTRIALE GEER S.p.A. — MERCA
OGEYSIIN ISUGU YEERID FADHI CAADI AH

Maamulaha kaliya ee Agricola Industriale GEER S.p.A. oo fadhi-giisu xaga sharciga yahay Marka, wuxuu isugu yeeraayaa dhammaan dadkii shirkadda ku jirey iyo Duqoowdii Magaalada sidey uga soo qeybgalaan Fadhiga Caadiga ah oo la qaban doono maalinta 30ka bisha Jen-naayo 1975, isagoo kaasu yahay isugu yeeridii u horeysey, laguna qaban doono Xaafiiska Qareenka Comar Xaaji Moxamed «Bot», si looga wada xaajoodo arrimaha ugu horeeya maalinta:

1. — Tallabooyin waafaqsan Qodobka 2364 c. c.
2. — Talaabooyin kala duwan.

Fadhiga hore haddii aan la gaarin cadadkii sharcigu doonaaye dib baa loogu dhigaayaa maalinta bishu tahay 15-2-1975.

Ogeysiiskakani wuxuu burinaayaa heddelaayaana kii hore.

Marka, 9 December 1974.

Agr. Ind. GEER S.p.A.
Maamulaha Kaliya

(266)

SHIRKADDA FIYAAT SOOMAALIYA S.p.A. — MUQDISHO
OGEYSIIS

Waxaa la ogeysiinaya in taariikhda markii ay ahayd 4-12-1974 Shir-kadda Fiyaat Soomaaliya S.p.A. ee Muqdisho ay kordhisay hantida iskaa-shatada (Capitale Sociale) min Sh. So. 1.450.000,00 ilaa 1.700.000,00.

Muqdisho, 11kii Disember 1974.

AL MAAMULE
Dr. Ezio Schierano

(267)

FIAT SOMALIA S.p.A.
Capitale versato Sh. So. 1.700.000,00
Xaruunteeda Xamar Ah

OGEYSIIS

Waxaa la ogeysiinayaa in Shirka Guud aan caadiga ahayn ee dadka ku jira Shirkadda Fiat Somalia S.p.A. ay isku imanayaan maalinta 29ka diisembar 1974 markay saacadu tahay 9,00 shirka hore, amase maalinta 30ka diisembar 1974 isla 9,00 shirka labaad; shirkaaso lagu qaban doono xaruunta ee wadada Balcad in laga xaajoodo ajendada maalinta ah

ORDINE DEL GIORNO:

1. — Kordhinta maaliyadda shirkadda min 1.700.000 ilaa 1.900.000.
2. — Beddelka Qodobka 5aad ee xeerka (statuto).

Muqdisho, li 15ka diisembar 1974.

AL MAAMULE
Dr. Ezio Schierano

(268)